

## Macluumaadka sunta cayayaanka

### Sunta cayayaanka

Sunta cayayaanka ayaa waxay xakamaysaa cayayaanno kala duwan sida cayayaanka, haramaha, iyo bakteeriyada. Waxaa loo isticmaalaa beero falashada, gudaha iyo hareeraha guriga, iyo meelo kale oo badan. Carruurta waxay ku soo gaari kartaa sunta cayayaanku meelaha ay ku nool yihiin, wax ku bartaan, iyo ku ciyaaraan.

Saamaynta caafimaad ee sunta cayayaanku waxay ku xiran tahay sunta cayayaanka ee camiyani lafteeda. Tusaale ahaan, qaarkood ayaa laga yaabaa inay waxyeelleeyaan nidaamka dareenka neerfaha, in ay xasaasiyad ku kiciyaan maqaarka ama indhaha, ama ay kordhiyaan khatarta kansarka. Dhallaanka iyo carruurta waxay inta badan aad uga nugul dadka waaweyn. Si kastaba ha ahaatee, kaadida ilmaha in laga helo sunta cayayaanka ayaa ah waa wax caadi ah oo macnaheedu maaha in caafimaadka ilmahaaga ay saamayn doonto. Saynisyahannadu waxay weli baranayaan heerarka laga yaabo inayna ammaan ahayn.

Sunta cayayaanku waxay isu bedeli kartaa kiimikooyin la xiriiira marka ay jirka galaan. Waxaan ugu yeernaa kuwan “kiimikooyinka qurubyada ah” (“breakdown products”) Healthy Kids Minnesota aayaa waxay ka baartay siddeed kiimiko kaadida ilmahaaga—hal sunta cayayaanka lagu dilo ah iyo todobo burburka kiimikooyinka ah.



Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo agab, fadlan soo booqo boggeena: [Healthy Kids Minnesota: Macluumaadka Kiimikooyinka iyo Khayraadka](#)

## Sunta Cayayaanka ee Laga Baaray Kaadida Ilmahaaga

### 2,4-D

#### Waa maxay isticmaalkooda ugu muhiimsan?

- Waxay xakamaysaa cawska haramaha ah ee ku baxa cawska guriga
- Waxaa si weyn loogu isticmaalaa beeraha si loo xakameeyo haramaha

#### Maxay yihiin siyaabaha ugu badan ee carruurta ay ku soo gaaraan?

- Cunista cuntada
- Ku dul ciyaarista cawska la daweyay
- Ku isticmaalka beeraha agagaarka ka dhow

### IMPY

Qurubyada/burburka kiimikada diazinon

#### Waa maxay isticmaalkooda ugu muhiimsan?

Waxay xakamaysaa cayayaanka ku jira beeraha (dalagga, xoolaha)

#### Maxay yihiin siyaabaha ugu badan ee carruurta ay ku soo gaaraan?

- Cunista cuntada
- Ku isticmaalka beeraha agagaarka ka dhow

## Sunta Cayayaanka ee Laga Baaray Kaadida Ilmahaaga sii socota

### PNP

Qurubyada/burburka kiimikada methyl- iyo ethyl-parathion

#### Waa maxay isticmaalkooda ugu muhiimsan?

- Markii hore waxaa loo isticmaali jiray in lagu xakameeyo cayayaanka beeraha laakiin hadda lama ogola isticmaalkeeda Maraykanka
- PNP sidoo kale waa qurubyo walxo oo ah kiimikooyinka warshadaha oo loo yaqaan nitrobenzene

#### Maxay yihiin siyaabaha ugu badan ee carruurta ay ku soo gaaraan?

Ku noolaanshaha meel u dhow warshadaha isticmaala ama sii daaya nitrobenzene

### TCPY

Qurubyada/burburka kiimikada chlorpyrifos- iyo chlorpyrifos-methyl

#### Waa maxay isticmaalkooda ugu muhiimsan?

- Guriga dhexdiisa, chlorpyrifos waxa lagu isticmaali karaa dabinada qudhaanjada iyo baranbarada lagu dabo oo kaliya - lama ogola isticmaalka kale ee guriga
- Guriga dibaddiisa, chlorpyrifos waxa loo isticmaali karaa oo keliya in lagu xakameeyo cayayaanka meelaha carruurta yaryari ayna wakhti ku qaadan, sida buundooyinka golf-ka
- Chlorpyrifos-methyl waxaa loo isticmaalaa haruurka kaydsan

#### Maxay yihiin siyaabaha ugu badan ee carruurta ay ku soo gaaraan?

Cunista cuntada\*

*\*Isticmaalka Chlorpyrifos ee dalagyada cuntada lama ogola wixii ka dambeeya Febraayo 2022*

### 3-PBA, 4-F-3-PBA, trans-DCCA, cis-DCCA

Qurubyada kiimikooyinka ee ka yimaada koox ka mid ah sunta cayayaanka ee loo yaqaan pyrethroids

#### Waa maxay isticmaalkooda ugu muhiimsan?

- Xakamaynta cayayaanka ee guriga iyo deyrka/beerta guriga
- Waxaa loo isticmaalaa qaar ka mid ah badeecooyinka takfida iyo shilinta ee xayawaanka rabaayada ah
- Xakamaynta cayayaanka ee beeraha

#### Maxay yihiin siyaabaha ugu badan ee carruurta ay ku soo gaaraan?

- Cunista cuntada
- Soo gaaritaanka meelaha la daweyay ee guriga iyo daarada ah
- Soo gaarista xayawaanka rabaayada ah
- Ku isticmaalka beeraha agagaarka ka dhow

## Sida aad hoos ugu dhigi karto soo gaarista sunta cayayaanka



### Sunta cayayaanka loo isticmaalo guriga dhexdiisa

Waxay khusaysaa TCPY, 3-PBA, 4-F-3-PBA, trans-DCCA, cis-DCCA

#### Siyaabaha aad hoos ugu dhigi karto soo gaarista ilmahaaga

In aad ka dhigto gurigaaga meel aan soo dhawaynayn cayayaanku waa habka ugu fiican ee looga fogaado isticmaalka sunta cayayaanka sida si degdega ah in aad u nadiifisaan cuntada daata, gufaynta godadka iyo dildilaacyada, iyo hagaajinta tuubooyinka daadinaya.

Haddii aad u baahan tahay inaad isticmaasho alaabta xakamaynta cayayaanka:

- Hubi inaad si sax ah u aqoonsato cayayaanka iyo in cayayaanku ku qoran yahay calaamadda sunta.
- Akhri oo raac tilmaamaha ku yaalla calaamadaynta alaabta.

- Dooro dabinka iyo jel. Way ka xaddiditaan badan yihiin kuwa lagu buufiyo. Dhig dabinka iyo jelka meel aanay ilmahaagu ama xayawaanku taaban karin.
- Haddii aad isticmaalaysaan kiimikada buufinta ah, ku xaddida isticmaalka meelaha lala beegsanayo ama daloolada iyo dillaacyada. Laydhi gurigaaga adigoo furaya daaqadaha.
- Ku hay ilmahaaga, xayawaanka, alaabta lagu ciyaaro, dharka, iwm. meel ka fog aagga la daweeeyay.
- Iska daaya adeegsiga kiimikada ceeryaamada ah ama bambooyinka cayayaanka (foggers or bug bombs).
- Haddii dhibaataada cayayaanku ay daran tahay, tixgeli inaad soo kiraysato daaweeye shahaadaysan.
- Had iyo jeer ku kaydi sunta cayayaanka weelkooda asalka ah meel aysan gaaraynin ilmahaagu.



### Sunta cayayaanka ee loo isticmaalo cawska daarada

Waxay khusaysaa 2,4-D

#### Siyaabaha aad hoos ugu dhigi karto soo gaarista ilmahaaga

Ilaalinta in cawskaagu ahaado mid adag oo caafimaad qaba ayaa ah habka ugu fiican ee aad isaga ilaalin karto isticmaalka sunta cayayaanka sida kuwa dila haramaha.

Tixgeli inaad u dulqaadato qaar ka mid ah waxyaabaha aadan jeclayd, sida haramaha ku jira cawskaada.

Haddii aad u baahan tahay inaad isticmaasho alaabta xakamaynta cayayaanka:

- Hubi inaad si sax ah u aqoonsato cayayaanka iyo in cayayaanku ku qoran yahay calaamadda sunta.

- Akhri oo raac tilmaamaha ku yaalla calaamadaynta alaabta.
- Hubi in carruurta iyo xayawaanka rabaayada ah aysan u dhowayn markaad sunta u adeegsanayso kana ilaali ilmahaaga iyo xayawaankaaga aagga aad daawaysay muddada wakhtiga ku qoran calaamadda.
- Alaabta dareeraha ah, dooro maalin cimiladu deggantahay si ayan meelo kale u gaarin.
- Kabaha iyo wixii dhar ah iska siib kahor inta aadan guriga gelin adeegsiga kadib.
- Had iyo jeer ku kaydi sunta cayayaanka weelkooda asalka ah meel aysan gaaraynin ilmahaagu.



### Sunta cayayaanka ee cuntada dulsaaran

Waxay khusaysaa dhammaan kiimikooyinka marka laga reebo PNP

#### Siyaabaha aad hoos ugu dhigi karto soo gaarista ilmahaaga

- Dhaq miraha iyo khudaarta kahor inta aan la cunin.
- Ka eeg websaydkeena liistada miraha iyo khudaarta leh haraaga sunta cayayaanka ee ugu badan iyo kuwa ugu yar.



### Sunta cayayaanka loo isticmaalo xayawaanka rabaayada ah

Waxay khusaysaa 3-PBA, 4,F,3-FPBA, trans-DCCA, cis-DCCA

#### Siyaabaha aad hoos ugu dhigi karto soo gaarista ilmahaaga

- Weydii dhakhtarka xoolahaaga inuu kaa caawiyiyo xulashada alaabta ugu habboon.
- Raac tilmaamaha ku qoran calaamadda oo weligaa ha ka badinin daaweynta xayawaankaaga rabaayada ah.

## Sida aad hoos ugu dhigi karto soo gaarista sunta cayayaanka sii socota



### Sunta cayayaanka ee ku jirta hawada ka timaada beeraha iyo guryaha deriska

Waxay khusaysaa dhammaan kiimikooyinka marka laga reebo PNP

#### Siyaabaha aad hoos ugu dhigi karto soo gaarista ilmahaaga

Ilmahaaga iyo xayawaankaaga ku hay gudaha oo ay daaqaaduhu u xiranyihiin haddii aad ogtahay in meel idiin dhow lagu buufinayo sunta cayayaanka.

Haddii aad u malaynayso in ilmahaaga ay soo gaartay sunta cayayaanka oo dabaysha la socdaa, raac tillaabooyinkan:

- Wax ka qabo xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka marka hore oo wac 911, haddii loo baahdo.
- Wac Nidaamka Xakamaynta Sunta ee Minnesota 24/7 (800)222-1222 ama dhakhtar si loo go'aamiyo inay u baahan yihiin daryeel caafimaad.
- U soo sheeg dhacdada Waaxda Beeraha ee Minnesota: 651-201-6333. Dabayl raacinta sunta cayayaanka ayaa waxaa mamnuucaya sharciga Minnesota.



### Sunta cayayaanka ee ku jirta Biyaha la Cabo

Waxay khusaysaa dhammaan kiimikooyinka marka laga reebo PNP

#### Siyaabaha aad hoos ugu dhigi karto soo gaarista ilmahaaga

Biyaha ka imaanaya nidaamyada biyaha ee dadweynaha ayaa horay looga baaray sunta cayayaanka oo badan.

Haddii aad ka welwelsan tahay sunta cayayaanku in ay ku jirto ceelkaaga gaarka ah, tixgeli khatarta ceelkaaga:

- Sunta cayayaanku waxay u badan tahay inay ku jirto ceelasha ku yaallameelaha beeraha ah ee leh biyaha hoostiisa ku jirta oo u nugul. Waxaa websaydka ku jira khariidad nuglaanta biyaha
- Ka baaritaanka Nitrate-ka ayaa waxay muujin kartaa haddii ay biyahaaga ku jiraan sunta cayayaanka. Saddex milligaraam litirkii nitrate ahba ama in ka badan, suurtogalnimada ayaa sii korodha.
- Haddii aad ka welwelsan tahay sunta cayayaanka ee biyahaaga ku jirta, aaladaha daaweynta ee reverse osmosis (RO) ayaa waxay ka saaraan ku dhawaad dhammaan sunta cayayaanka marka si habboon loo dayactiro.



### Hadhaaga Sunta Cayayaanka ee Guriga lagaKeenay Shaqada

Waxay khusaysaa dhammaan kiimikooyinka

#### Siyaabaha aad hoos ugu dhigi karto soo gaarista ilmahaaga

- Raac hab-dhaqannada shaqada ee badbaadada ah oo raac tilmaamaha calaamaddaha alaabta.

- Ha keenin gurigaaga weelasha sunta cayayaanka ama cayayaanka shaqada.
- Shaqada kadib, beddelo dharkaaga iyo kabaha kahor inta aanad gelin gurigaaga iyo gaarigaaga. Qubayso kahor inta aanad taaban ilmahaaga.
- Ku dhaq dharka shaqada si ka gooni ah dharka kale.

#### Waaxda Caafimaadka ee Minnesota

#### Minnesota Department of Health

Barnaamijka Baaritaanka Kiimikooyinka ku jira jirka  
Biomonitoring Program  
625 Robert St N  
PO BOX 64975  
St. Paul, MN 55155-2538

[health.biomonitoring@state.mn.us](mailto:health.biomonitoring@state.mn.us)

[www.health.state.mn.us](http://www.health.state.mn.us)

11/01/22

Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, email u soo dir [health.biomonitoring@state.mn.us](mailto:health.biomonitoring@state.mn.us)